Wasaaradda Waxbarashada ee NSW

## Behaviour code for students

Information for students and parents or carers

# Xeerka dhaqanka ardayda

## Macluumaadka loogu talagalay ardayda iyo waalidiinta ama xannaaneeyayaasha

Dugsiyada dadweynaha ee NSW waxaa ka go'an inay bixiyaan jawi waxbarasho oo ka jawaabaya baahida, oo teegaraya ammaana u ah qof kasta guud ahaan goobo kala duwan. Waxaan barnaa oo jilnaa dhaqan ammaan ah oo qof walba ku jiro waana qiimeynaynaa ardaydeena.

**Ardayda Dugsiyada dadweynaha ee NSW waxaa laga filayaa, awoodooda inta ugu fiican, inay:**

- xushmeeyaan ardayda kale, macalimiintooda, shaqaalaha dugsiga iyo xubnaha bulshada
- raacaan xeerarka fasalka iyo dugsiga iyo tilmaamaha macalimiintooda
- ku dadaalaan heerarka ugu sareeya ee waxbarasho
- u dhaqmaan si ixtiraam iyo xushmad leh oo ka dhigaya dhammaan xubnaha bulshada dugsiga qiimo inay leeyihiin, kana mid yihiin lana taageerayo
- u xaliyaan isafgaranwaaga si xushmad leh, degan oo cadaalad ah
- fuliyaan qorshaha laysku raacay ee dharka dugsiga ama xeerka labiska
- yimaadaan dugsiga maalin kasta (in si sharci ah loo sii daayey mooyee)
- xushmeeyaan dhammaan hantida
- ahaadaan kuwo ammaan ah oo aan dagaalamin ama aan keenin hub , maandooriye sharci daro ah, aalkalo, vapes , e-sigaar ama tubaako dugsiyadeena
- xoog u sheegan, dhibin, baqdin gelin ama takoorin qofna dugsiyadeena dhexdiisa.

Dugsiyadu waxay ka qaadayaan talaabo ay kaga jawaabayaan dabeecada dhibaatada badan u leh nafsadooda ama kuwa kale ama gaarida waxbarashada iyo waxbarida tayada sare leh.

**Dhammaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay:**

- ammaan ku helaan dugsiga
- helaan oo ay si buuxda uga qaybgalaan waxbarashadooda
- ay ula dhaqmaan ardayda kale, macalimiinta iyo shaqaalaha dugsigu si xushmad leh
- soo jeediyaan fekerkooda, ay hadaf dejistaan oo ay nafsadooda u doodaan.

Maamulaha iyo shaqaalaha dugsiga iyagoo isticmaalaya go'aankooda xirfadeed, waxay u joogaan meel fiican oo ay ku dhowrayaan anshaxa oo ay ku bixinayaan jawi waxbarasho oo ka jawaabis leh, taageero iyo amaana bixinaya oo isticmaalaya tallaabada ku haboon markay ardaydu fulinaynin waxyaalahan laga rajaynayo.

Wasaaradda ayaa masuul ka ah bixinta qaabka qorshaha iyo ilaha macluumaadka sida wargeysyada arimaha sharciga, helitaanka tallo takhasus leh iyo waxbarasho xirfadeed oo lagu hagayo maamulayaasha iyo shaqaalahooda iyagoo isticmaalaya go'aankooda xirfadeed.

Xaaladaan, Dawlada NSW iyo Wasaaradda Waxbarashada waxay taageerayaan maamulka iyo go'aamada maamulada iyo shaqaalaha dugsiga ee ah heerka hoose.

**Xeerka Dabeecada loogu talagalay ardayda: Ficilada ardayda**

Horumarinta ka mid ahaanshaha, waxbarashada, fayoqabka, iyo ammaanka dhammaan ardayda ku jirta dugsiyada dadweynaha ee NSW waa mudnaanta ugu sareysa ee Wasaaradda Waxbarashada.

Waxaan dhaqangelinaa waxbarida iyo hababka waxbarashada ee dhammaan goobaha kala duwan ee lagu taageerayo xirfadaha horumarinta ay u baahan yihiin ardaydu si loo fuliyo heerarka sare ee xushmada badan, ammaanka iyo dabeecada hawlgashan.

**Si loo fuliyo waxa la rajaynayo ee kor ku qoran, ardayda dugsiyada dadweynaha ee NSW, intay awoodaan ee ugu fiican, waa inay ku dheganaadaan xeerarkaan soo socda.**

## Xushmad

- Midba midkiina kale si sharaf leh ha ula dhaqmo.
- Kuwada xiriira oo uwada dhaqma si edboon.
- Ula dhaqan oo ula shaqeeya si iskaashi leh ardayda kale, macalimiinta iyo shaqaalaha dugsiga.
- Samee xiriir wanaagsan oo xushmad leh.
- Qiimee danaha, awooda iyo dhaqanka kuwa kale.
- Xushmee baahiyaha waxbarasho ee ardayda kale.
- U labiso si haboon adoo xiranaya dharka dugsiga ee laysku raacay ama xeerka dharka.
- Ka taxadar hantida dugsiga iyo hantida shaqaalaha iyo ardayda kale.

## Ammaan

- Jil oo raac xeerarka fasalka iyo dugsiga iyo waxyaalaha laga rajaynayo ee dabeecad iyo dhaqanba ah.
- Kawada hadla oo xaliya isafgaran waaga.
- Iska ilaali oo masuulyadeeda qaad dabeecadoodu iyo ficiladooda saameeya kuwa kale.
- Ka taxadar nafsadaada iyo kuwa kaleba.
- Ammaan ahow oo caawi kuwa kale si ay u sameeyaan doorashooyin ammaan ah oo aan iyaga waxyeelin ama kuwa kale.

## Hawlgalka

- Dugsiga iyo fasalka kaalay wakhtigiisa.
- U diyaar garow cashar kasta.
- Si firfircoon uga qaybgal waxbarashadaada.
- Raadi oo ku dadaal inaad gaadho heerarka ugu sareeya ee waxbarasho.

### Adeega turjumaanka taleefanka

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad intaas ka badan fadlan wac maamulaha dugsiga. Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawa weydiintaada, fadlan ka wac Adeega Turjumaanka Taleefanka 131 450 oo weydiiso turjumaan luuqadaada ah.

U sheeg xiriiriyaha lambarka taleefanka aad dooneysid inaad wacdid xiriiriyuhuna wuxuu khadka soo gelin doonaa turjumaan kaa caawiya wada hadalka. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.